Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Guddiga Garsoorka, Awqaafta
Iyo Arimaha Diinta

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
لجنة القضاء والأوقاف والشؤون الدينية

Federal Republic of Somalia
House of the People
Judiciary, Endowments and Religious Affairs committee

**Ref: GGAAD/B11/75/2025** **Taariikh:** Nov. 02, 2025

**Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka** **= Muqdisho =**

**Ujeeddo:Warbixinta Akhrinta 3aad ee H/sharciyeedka Dib-u-eegista Sharciga La-dagaallanka Burcad-badeedka iyo Ka-hortagga Af-duubka ee Sharci Lr. 36 ee 30 Abriil 1975**

Mudane Guddoomiye, Mudaneyaal;

Guddiga Cadaaladda, Garsoorka, awqaafta iyo arrimaha Diinta ee Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 90aad Faqradda 1aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabkan halkan idinkugu soo gudbinayaa **H/sharciyeedka Dib-u-eegista Sharciga La-dagaallanka Burcad-badeedka iyo Ka-hortagga Af-duubka.**

Mudane Guddoomiye, Guddigu isagoo raad-raacaya dhammaan talooyinkii, tilmaamihii iyo soojeedintii xildhibaannada isla markaana qaddariyey afkaartii badneyd ee Akhrinta 2aad soo gudbiyeen xildhibaannada Golaha shacabka, Guddigu wuxuu si dhab ah uga shaqeeyey sharciga, waafajiyeyna Dastuurka KMG iyo shuruucda kale ee dalka, soona saxay meelihiii aadka looga dooday ee u baahnaa in dib-u-eegis lagu sameeyo. Qodobbada dib-u-habeynta lagu sameeyey waxayna kala yihiin:

Mudane Guddoomiye, Hindise-sharciyeedkan markiisii hore wuxuu ahaa ***17 qodob***, Ka dib markii uu Guddigu dib-u-eegis ku sameeyay wuxuu tirey, toosiyey ama bedelay qodobada qaar sida hoos ku xusan:

**Qod. 2aad** Ujeedada Sharciga waxaa loo kala saarey labo Faqradood waxaana la waafajiyey Xeerka caalamiga ah ee Q.M.ee Badaha(UNCLOS 1982).

**Qod**. 3**aad** Faqraddiisa 1aad ayaa Qeexitaanka UNCLOS la waafajiyey, waxaa la tiray farqadaha 2aad iyo 3aad. **Qod. 4:** farqadiisa 1aad ayaa labo xaraf(A iyo B) loo kala qeybiyey, Farqadda 2aad na Siiqo Toosin baa lagu sameeyey. **Qod.5:** Cinwaanak ayaa la siiqo toosiyey, Farqadda 1aad iyo 2aad waa la bedellay, Farqad cusub oo 3aadna waa la soo kordhiyey**. Qod.6:** cinwaanka ayaa la siiqo toosiyey, farqad 2aadna waa la soo kordhiyey. **Qod.7:** Cinwaanka siiqo toosin lagu sameyey, farqad 2aad iyo 3aadna waa la soo kordhiyey. **Qod.8:** Sixid iyo Siiqo Toosin ayaa lagu sameeyey. **Qod.9:** Wax ka bedel ayaa lagu sameyey. **Qod. 10:** farqadda 1aad waa lasaxey, farqad 2aadna waa la soo kordhiyey. **Qod.11:** cinwaanak ayaa la siiqo toosiyey., farqaddisa 2aadna waa la saxey. **Qod.12:** Wax ka bedel ayaa lagu sameeyey Cinwaanka, farqaddiisa 1aadna wax ka bedel ayaa lagu sameyey, farqadda 2aadna siiqo toosin baa lagu sameyey. **Qod.13:** farqaddiisa 1aad ayaa siiqo toosin lagu sameyey.**Qod.15:** waa latirey. **Qod. 16:** waxaa lagu sameeyey siiqo toosin.

Ugu dambayn, Mudane Guddoomiye iyo Xubnaha Sharafta leh, idinkoo tixraac ka dhigaya nuqulka rasmiga ah ee H/sharciyeedka Dib-u-eegista Sharciga La-dagaallanka Burcad-badeedka iyo Ka-hortagga Af-duubka, oo halkan ku lifaaqan waxaan si sharaf leh idinkaga codsanaynaa inaad Hindise-sharciyeedkan ansixisaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GUDDIGA GARSOORKA OWQAAFTA IYO ARRIMAHA DIINTA
GOLAHA SHACABKA

Mahadsanidiin

**Xil. Cali Xaaji Daahir**
**Guddoomiyaha Guddiga Caddaaladda, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta-GSH**

+252-907717720/+252-615022824/+252-610366060

Email:judiciary.committee@parliament.gov.so

https://gsh.parliament.gov.so/

JamhuuriyaddaFederaalkaSoomaaliya
Golaha Shacabka
GuddigaGarsoorka, Awqaafta
iyoArimahaDiinta

جمهورية الصومال الفيدرالية
الشعبمجلس
لجنة القضاء والأوقاف والشؤون الدينية

Federal Republic of Somalia
House of the People
Judiciary, Endowments and Religious Affairs committee

**Tr. 2/11/2025**

Tariikh.___________Kal.___________Kul.____________Sac.Fur._____Sac. Xir.____________

Goobta.______________________________________________

Ajendaha.

Shirgudoonka. ______________________________________________

Go'anka Guddiga. ______________________________________________

## LIISKA XUBNAHA GUDDIGA

| No : | Magaca | Xilka | phone | Saxiixa |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Xil. Cali Xaji Dahir | Guddoomiye | | |
| 2. | Xil. Mohamed Abdullahi burale | G. Kuxigeen | | |
| 3. | Xil. Zamzam Mohamed Omar | Xoghaye | | |
| 4. | Xil. Abdirahman Mohamed Husen Odawaa | Xubin | | |
| 5. | Xil. Mahad Abdala Awad | Xubin | | |
| 6. | Xil. Ismail Eid Mohamed | Xubin | | |
| 7. | Xil. Mohamed Mursal Sheikh Abdirahman | Xubin | | |
| 8. | Xil. Abdulasis Mahamed Mahamud Qambi | Xubin | | |
| 9. | Xil.Abdishukur Ali Mire | Xubin | | |
| 10. | Xil. Faiza Mahamed Jayte | Xubin | | |
| 11. | Xil. Mahamud Abdirahman Omar | Xubin | | |
| 12. | Xil. Mohamed Nur Abubakar (shariif mustafa) | Xubin | | |
| 13. | Xil. Abdulahi Osman Duale | Xubin | | |
| 14. | Xil. Dr. Mohamed Sheikh Ahmed | Xubin | | |
| 15. | | | | |

+252-907717720/+252-615022824/+252-610366060

Email:judiciary.committee@parliament.gov.so

https://gsh.parliament.gov.so/

# Hindise-sharciyeedka Dib-u-eegista Sharciga La-dagaallanka Burcad-badeedka iyo a-hortagga Af-duubka ee Sharci Lr. 36 ee 30 Abriil 1975

WASAARADDA CADDAALADDA IYO DASTUURKA

# Contents


Qodobka 1aad ..... - 1 -

Magaca Sharciga ..... - 1 -

Qodobka 2aad: ..... - 1 -

Ujeeddada Sharciga ..... - 1 -

Qodobka 3aad ..... - 1 -

Qeexid ..... - 1 -

Qodobka 4aad: ..... - 2 -

Baaxadda Sharciga ..... - 2 -

Qodobka 5aad ..... - 2 -

Dembiyada ..... - 2 -

Qodobka 6aad: ..... - 3 -

Qarin Dembi ..... - 3 -

Qodobka 7aad: ..... - 3 -

Xuquuqda Aadanaha ..... - 3 -

Qodobka 8aad ..... - 3 -

La-wareegid ..... - 3 -

Qodobka 9aad ..... - 4 -

Maxkamadda Awoodda u leh ..... - 4 -

Qodobka 10aad ..... - 4 -

Qaadista Dacwadda ..... - 4 -

Qodobka 11aad: ..... - 4 -

IS-DHAAFSI MAXAABIIS ..... - 4 -

Qodobka 12aad ..... - 5 -

Iskaashi ..... - 5 -

Qodobka 13aad ..... - 5 -

Dammaanad-ku-deyn ..... - 5 -

Qodobka14aad ..... - 5 -

Hab-raaca Dacwadaha ..... - 5 -

Qodobka 15aad ..... - 6 -

Baabi'in ..... - 6 -

Qodobka 16aad ..... - 6 -

Dhaqan-gal ..... - 6 -

**Qodobka 1aad**

**Magaca Sharciga**

1. Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga La-dagaallanka Burcad-badeedka iyo Ka-hortagga Af-duubka".
2. Sharcigan wuxuu ku saleysan yahay raadraac iyo wax-ka-beddel lagu sameeyey Sharcigii hore ee Af-duubka; (Sharcİ Lr. 36, ee 30, Abriil 1975).

**Qodobka 2aad:**

**Ujeeddada Sharciga**

Ujeeddada sharcigani waa tilmaamidda iyo nidaaminta dembiyada la xiriira:

a) Burcad-badeedka si waafaqsan Heshiiska Qaramada Midoobay ee Sharciga Badaha 1982 (United Nations Conventions for the Law of the Sea 1982) iyo xukunka ka dhalanaya fal-dembiyeedkaas; iyo
b) Af-duubka loo geysto dadka, diyaaradaha, maraakiibta iyo gaadiidka kale ee gudaha geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**Qodobka 3aad**

**Qeexid**

Iyadoo la eegayo ujeeddada Sharcigan erayada soo socda waxaa mid walba lagu qeexayaa sida soo socota:

1. "Burcad-badeed" waxaa loola jeedaa

a) Fal kasta oo sharci-darro ah ama af-duub, ama fal kasta oo weerar ah, isla markaana loo galo dano gaar ah, kaasoo ay geystaan shaqaalaha ama rakaabka markab ama diyaarad gaar loo leeyahay, isla markaana:

1. lagu galo badaha caalamiga (biyaha caalamiga), kaasoo lagula kaco markab ama diyaarad kale, ama lagula kaco dadka, ama hantida saaran markabkaas ama diyaaradaas; ama
2. loo geysto markab, diyaarad, dad ama hanti meel ka baxsan ikhtisaaska dal kasta.

b) Fal kasta oo la xiriira ka-qeyb-qaadashada hawl-gal lagu fulinayo markab ama diyaarad isagoo og xaqiiqda markabkaas ama diyaaradaas in ay tahay mid burcad-badeed; iyo
c) Fal kasta oo si ula-kac ah u dhiirri-gelinaya ama fududaynaya fal-dembiyeedka ku xusan xarfaha (a) ama (b) ee faqraddan.

2. “Markab ama diyaarad burcad-badeed” waxaa loola jeedaa markab ama diyaarad kasta oo loo adeegsado ama ay la wareegaan maamulkiisa dad, si ay ugu galaan fal-dembiyeed burcad-badeednimo.

3. “Markab dawladeed ama diyaarad dawladeed oo lagu galo fal burcad-badeed” waxaa loola jeedaa falalka burcad-badeednimada, sida ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, ee uu geysto markab dawladeed, ama diyaarad dawladeed oo shaqaalihii saarnaa ay la wareegaan maamulka markabka ama diyaaradda, waxayna la mid tahay falalka uu sameeyo markab ama diyaarad gaar loo leeyahay.

## Qodobka 4aad:
## Baaxadda Sharciga

1. Sharcigan wuxuu qabanayaa:
   a) Falalka burcad-badeedka ee ka dhaca biyaha caalamiga kaasoo ay Soomaaliya ku leedahay awood fulineed si waafaqsan xeerka caalamiga ee qaramada midoobay ee badaha (UNCLOS 1982).
   b) Falalka la xiriira af-duubka ee ka dhaca gudaha berriga, cirka iyo badda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Sharcigan waxaa lagu dabaqayaa qof kasta oo gala fal-dembiyeedka ku xusan sharcigan iyadoo aan loo eegayn jinsiyadda uu wato.

## Qodobka 5aad
## Dembiyada

1. Qofkasta oo gala fal-dembiyeedka ku xusan Qodobka 4aad farqadda (1)(a) ee Sharcigan, wuxuu muteysanayaa xabsi u dhaxeeya shan (5) ilaa labaatan (20) sano.
2. Qofkasta oo gala fal-dembiyeedka ku xusan Qodobka 4aad farqada (1)(b) ee Sharcigan, wuxuu muteysanayaa xabsi u dhaxeeya toban (10) ilaa labaatan (20) sano.
3. Kalluumaysatada shisheeye ee ka geysta gudaha badda Soomaaliya fal sharci-darro ah, isla markaasna waxyeelleeya kalluumaysatada ama deegaanka badda Soomaaliya waxaa lagu xukumayaa xabsi u dhexeeya shan (5) ilaa toban (10) sano ama ganaaxyada qodobka 21aad ee Sharci Lr. 008 ee 20 Maarso 2023 iyo jadwalkiisa A iyo lifaaqiisa B, iyo mag-dhawga khasaarihii ay geysteen.

## Qodobka 6aad:
## Qarin Dembi

1. Qof kasta oo ka war hela abaabulka dembiyada lagu sheegay Qodobka 5aad ee Sharcigan oo aan soo ogeysiin Ciidamada Nabadgelyada ee ku shaqada leh, wuxuu gelayaa dembi ciqaabtiisu xabsi 1 (hal) sano ilaa labo (2) sano ah, hantida uu ka dheefsaday fal-dembiyeedkanna waxaa la wareegeysa dawladda.
2. Farqada (1) ee Qodobkan waxaa laga soo reebayaa xubanaha qoyska dhow, marka laga reebo xaaladaha ka gaabinta soo-sheegiddu ay keeni karto khatar nololeed oo degdeg ah.

## Qodobka 7aad:
## Xuquuqda Aadanaha

1. Qof kasta oo ka qeyb-gala abaabulka dembiyada ku xusan Qodobka 5aad ee Sharcigan haddii uu soo sheego xogta dembiga inta aysan dawladdu helin xogtaas isla markaasna horseeda in la soo qabto dembiilayaasha geystay fal-dembiyeedka, waxaa laga cafinayaa ciqaabta qeybta uu ku lahaa dembiga.
2. Eedaysane kasta wuxuu xaq u leeyahay qareen, maxkamad cadaalad ah si waafaqsan mabaadi'da xuquuqda aadanaha ee Dastuurka JFS.
3. 3. Haddii dembiyada ku xusan sharcigan uu geysto qof ka yar da'da qaan-gaarka waxaa maxkamadayntiisa loo raacayaa si waafaqsan hab-raacyada xeerka maxkamadeynta da'yarta Soomaaliya (Xeer L. 13 1970)

## Qodobka 8aad
## La-wareegid

Hanti kasta oo ka dhalata fal damibiyeedyada ku xusan qodobka 5aad ee Sharcigan, waxaa la wareegaysa dawladda Soomaaliya, haddii hantidaas ay tahay hanti gaar loo leeyahayna waxaa loo celinayaa ciddii milkiyaddeeda lahayd.

**Qodobka 9aad**

**Maxkamadda Awoodda u leh**

Maxkamad awoodda u leh si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed ayaa qaadaysa dacwadda la xariirta dembiyada ku xusan Sharcigan.

**Qodobka 10aad**

**Qaadista Dacwadda**

1. Qofka lagu soo eedeeyo fal-dembiyeedka ku xusan Qodobka 5aad ee Sharcigan, waxaa lagu qaadi karaa dacwad isagoo maqan ama jooga.
2. Haddii qofka maqanaha ahi uu dalka ku soo laabto, dacwaddiisa ayaa dib loo furayaa waxaana qaadaya garsoorayaal ka duwan kuwii horay u qaaday dacwaddiisa.

**Qodobka 11aad:**

**IS-DHAAFSI MAXAABIIS**

1.Dembiyada ku xusan Sharcigan waxaa loo tixgelinayaa in lagu daro dembiyada maxaabiista ama eedeysanayaasha ee la is -dhaafsan karo, haddii uu jiro Heshiis u dhexeeya Dawladda Soomaaliya iyo Dawladdaha kale ee Maxaabiista ama eedeysanayaasha la is-dhaafsanayo.

2. Maqnaanshaha heshiis labada dhinac ah, dembiyada ku xusan Sharcigan waxay noqonayaan dembiyo la iskugu soo celin karo maxaabiista xukuman nidaamka isku dheelli-tirka (reciprocity – المعاملة بالمثل).

3. Iyadoo ay jirto lana dhawrayo dhaqan-gelinta sida ku xusan Qodobka 11aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ee 1963, ee xiriirka la leh dembiyada ku xusan Sharcigan waxaa markab kasta oo ka diiwaan-gashan dawladda ama heshiis kula jira

loola dhaqmayaa xilli kasta oo uu shaqada ku jiro, meel kasta oo uu marayo, xitaa badaha dal kale hadba sida uu yahay xiriirka ka dhaxeeya Dawladda Soomaaliya iyo Dawladda heshiiska uu la galay.

## Qodobka 12aad
## Iskaashi

1. Biyaha Caalamiga ama meel kasta oo ka baxsan awoodda dawladda Soomaaliya, dal kasta wuxuu xayiri karaa markab burcad-badeed ah ama diyaarad ay qabsadeen burcad-badeed, waxayna sidoo kale awood u leeyihiin xiridda iyo xayiraad hantida iyo dadka saaran.

2. Qabashada burcad-badeedka waa in lagu fuliyo maraakiib dagaal, ciidanka cirka, maraakiib ama diyaarado kale oo si cad u calaamadsan oo loo aqoonsan karo inay ku jiraan adeegga Dawladda loona oggol yahay fulinta hawshaas.

## Qodobka 13aad
## Dammaanad-ku-deyn

Dammaanad ku sii deynta eedeysanaha lagu helo fal-dembiyeedyada ku xusan Qodobka 5aad ee Sharcigan waxaa loo marayaa sida ku cad Qodobbada 59aad iyo 60aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka14aad
## Hab-raaca Dacwadaha

Xeer-ilaaliyaha Guud JFS ayaa soo magacaabaya dacwad-oogaha dembiyada lagu soo eedeeyey eedeysanaha iyadoo uu horgeynayo maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadaas si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta (XHC).

**Qodobka 15aad**
**Baabi'in**

Sharcigani wuxuu baabi'inayaa Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan.

**Qodobka 16aad**
**Dhaqan-gal**

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa markuu ansixyo Baarlamaanka JFS, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.